



**SOMALI NATIONAL
BUREAU OF STATISTICS**
Federal Republic of Somalia

TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA SOOMALIYA



LUULIYO 2026

Tusaha Sicirka Badeecadaha, Soomaaliya

Hordhac

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) waa tilmaame dhaqaale oo muhiim ah oo hal beeg u ah isbeddelka guud ee isugeynta boqoleys ee sicirka tafaariiqda ee badeecadaha iyo adeegyada ay iibsadaan qoysaska Soomaaliyeed. Waxay u adeegtaa sida qiyaasta asaasiga ah ee sicir bararka, ayada oo awood u siineysa siyaasad-dejiyayaasha, ganacsiyada, iyo cilmi-baarayaasha si ay u qiimeeyaan isbeddellada ascaarta una sameeyaan go'aamo dhaqaale oo maan-gal ah. Tan iyo Janaayo 2025, TSB-da Soomaaliya ayaa la sii daayay iyadoo la tixgelinayo hal beegyo cusub oo laga soo qaatay SAHANKA MIISAANIYADDA QOYSKA SOOMAALIYEED 2022 (SIHBS), iyadoo lagu lifaaqaayo kalasaarida cusub ee kharashka qoyska (COICOP 2018), warbixinta waxey ka turjumeysaa dhammaan Dawladaha Xubnaha ka ah Dowlada Federaalka ah. qoraal habraac ah ayaa laga helindoonaa Bogga Internet-ka ee SNBS.

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) waxaa lagu qeexay sidan:

Cabbirka isbeddelka celceliska miisaanka leh ee qiimaha tafaariiqda ay macaamiishu ku bixiyeen agabka iyo adeegyada mudo cayiman." meelaha ugu muhiimsan ee TSB-da loo adeegsan karo waxaa ka mid ah:

- Cabirka Sicir-bararka: Sicir-bararka sannadlaha ah (YoY) wuxuu isbarbar dhigayaa qiimaha hadda jira sanadkaan iyo qiimaha isla xiligii sannadkii hore, isagoo u adeegaya sida qalab loogu talagalay siyaasadda lacagta iyo maaliyadda.
- Go'aan-qaadasho Dhaqaale: Waxaa isticmaala hay'adaha dawladda, ganacsiyada, iyo hay'adaha caalamiga ah si loogu hagaajiyo mushaharka, qandaraasyada, iyo ka faa'iidooyinka bulshada.
- Falanqeynta Dhaqaalaha Guud: Waxay taageertaa qiimeynta awoodda wax iibsiga, hagaajinta qiimaha kharashka-nololeed, iyo xasilloonida dhaqaalaha.

Habka Uruurinta Qiimaha:

- Joogteynta: Waxaa xogta la aruuriyaa toddobaadka koobad iyo kan saddexaad ee bil kasta.
- Deeganada laga soo uruuriyo: Muqdisho (Caasimadda), Dhammaan Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka (FMS).
- Ash'yaada ama badeecadaha: Tiradoodu waa 537 shey, oo laga soo xulay Sahanka SIHBS 2022, waxaana loo kala soocay si waafaqsan Kala-soocidda Iisticmaalka Shaqsiga ee (COICOP) 2018 marka loo eego 13-ka qeybood.

Istaatistikada Muhiimka ah

Sannadle (luulyo 2026)

Laba iyo tobankii bilood ee la soo dhaafay Luulyo 2025 ilaa Luulyo 2026, TSB-da ayaa sare u kacay (+6.7%).

Qiima kororka ugu weyn ee laba iyo tobankii bilood ayaa ahaa: Madadaalada, Isboortiga iyo Dhaqanka (+14.3%) waxaana ugu sareeyey alaabaha madadaalada (+9.0)

- Makhaayadaha iyo Adeegyada Hoyga (+17.3%) sababtuna waa Adeegyada Makhaayadaha (+22%). Caafimadka (+9.9%) waxaana sababay adeega bukaan socodka (+17.1). iyo dawada iyo adeegyada caafimadka (+8.8%). Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska iyo Shidaalka (+8.6%). biyaha ayaana ugu sareeya (+16.5%). Adeegyada waxbarashada (9.3%) oo ay ku hogaamineyso waxbarashada xanaanadda caruurta iyo dugsiga dhexe (16.6%).

Isbeddellada hoos u dhaca ee is dheellitiraya:

- Gaadidka (-1.6%), Warfaafinta Iyo Isgaarinta (-1.8%), Ceymiska iyo Adeegyada Maaliyada (-0.5%), Daryeelka Shaqsiga, Badbaadinta Bulshada iyo Alaabooyinka iyo Adeegyada Kale (-1.3%).

Bishii (luulyo 2026)

Tusmada Sicirka Badeecadaha (TSB) waxuu kordhay 0.6% inta lagu jiray Bisha Luulyo 2026.

Qiima kororka ugu badnaa ee bishan wuxuu ahaa (kan ugu weyn ilaa midka ugu yar):

- Dharka iyo Kabaha (+2.0%) waxaana horseed u ahaa Kabaha (+5.4%). Cuntada iyo Cabitaannada (+0.9%) - waxaa horseeday soo kabashada hoos u dhaca bishii Juun. Caafimaadka (+0.2%) waxaana horseeday Adeegga bukaan socodka (+0.3%) iyo badeecadaha caafimaadka (0.4%).

Isbeddellada hoos u dhaca ee is dheellitiraya:

- Adeegyada waxbarashada (-1.2%) oo ka timid hagaajinta khidmadaha dugsiga. Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaasta & Shidaalada Kale (-0.6%) oo ay ku timid hoos-u-dhac ku yimid Biyaha iyo Korontada.

Shaxda 1. TSB, isbadalada (%) ee Sanadlaha & Billaha Soomaaliyeed

	Isbedalka Billah ah (%)	Isbedalka Sanadlaha ah (%)
Luulyo	0.6%	6.7%
Juun-26	-2.7%	8.1%
Maaajo-26	0.3%	8.4%


WARBIXINTA TSB-da EE SOOMAALIYEED – DHAMAAN QEYBAHA TSB-da

Jaantus 1. Heerka Sicir bararka marka loo eego TSB-da


Tixraaca TSB

Isbadelka boqoleyda ee labo iyo toban bilood

Mudada Tixraaca=2022



Jaantuska 2. Qodobbada ka Qeyqaatay sicir bararka (%). (Qeybaha ka qeybqaatay)



War bixin Kooban ee Dhaqdhaqaaqa Sannadlaha ah

Muddo 12 bilood ah ilaa luulyo 2026, TSB-da ayaa sare u kacay 6.7%.

Qiimo kororka ugu weyn Laba iyo tobankii bilood ee la soo dhaafay ayaa ahaa:

- Madadaalada, Isboortiga iyo Dhaqanka (+14.3%): taas oo ka timid Adeegyada Madadaalada (+9.0%). Taas oo muujineysa kharashyo badan oo ku baxaya hawlaha madadaalada iyo dhaqanka.
- Makhaayadaha iyo Adeegyada Hoyga (+17.3%): waxaana hogaaminaya Adeegyada Makhaayadaha (+22.0%). Taas oo tilmaameysa cadaadiska qiimo xoogan oo ka jira qeybta soo dhawaynta iyo cuntada.
- Caafimaadka (+9.9%): iyadoo Adeegyada Bukaana-socodka (+17.1%) iyo Daawada iyo Adeegyada Caafimaadka (+8.8%) ay yihiin kuwa ugu muhiimsan, taasoo muujinaysa kororka kharashka caafimaadka iyo daaweynta.
- Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska iyo Shidaallada Kale (+8.6%). Biyaha ayaa ku hogaaminaya (+16.5%) taas oo iftiimineysa kororka kharashyada korontada iyo adeegyada lagama maarmaanka ah,
- Adeega waxbarashada(+9.3%) oo ay hogaamineyso waxbarashada caruurnimada iyo dugsiga dhexe(+16.6%). Taas oo ka turjumeysa waxbarashada sare kharashka waxbarashada.


Hadaba, dhowr Qeybood ayaa laga diiwaangaliyey hoos u dhaca sanadlaha ah ee bisha luulyo 2026

- Gaadidka (-1.6%). Warbaahinta iyo Isgaarsinta (-1.8%), Ceymiska iyo Adeegyada Maaliyada (-0.5%), Daryeelka Shakhsi ahaaneed, Ilaalinta Bulshada iyo Alaabooyinka iyo Adeegyada Kala Duwan (-1.3%).

Shaxda 2. boqolkiiba isbeddelka heerka qaybta sannadlaha ah

DHAMAAN QEYBAHA TSB-da	% - isbeddel sannadle ah		
	Maaj-26	Juun-26	Luulyo 26
WADARTA GUUD EE TSB-da	8.4%	8.1%	6.7%
01 - CUNTO IYO CABITAANNADA	8.1%	8.0%	7.9%
02 - TUBAAKADDA	4.2%	3.0%	1.5%
03 - DHARKA IYO KABAHA	7.8%	8.0%	8.6%
04 - GURYAHA, BIYAHA, KORONTADA, GAASKA IYO SHIDAALKA KALE	9.7%	10.3%	8.6%
05 - AGABKA, AGABKA GURIGA IYO DAYACTIRKA GURIGA EE JOOGTADA AH...	5.2%	6.9%	5.9%
06 - ADEEGA CAAFIMAADKA	13.3%	11.8%	9.9%
07 - GAADIIDKA	6.0%	4.9%	-1.6%
08 - WARFAAFINTA IYO ISGAARINTA	4.8%	2.6%	-1.8%
09 - MADADAALADA, CIYAARAHA IYO DHAQANKA	12.3%	9.9%	14.3%
10 - ADEEGYADA WAXBARASHADA	15.8%	14.0%	9.3%
11 - MAQAAYADAH IYO ADEEGYADA HOYGA	23.3%	19.1%	17.3%
12 - CAYMISKA IYO ADEEGYADA MAALIYADA	3.8%	3.9%	3.6%
13 - DARYEELKA SHAKHSIGA AH, DARYEELKA BULSHADA IYO ADEEGYADA YAR YAR...	3.8%	3.2%	-1.3%

Jaantuska 3. Heerka Qeybinta isbadalka boqoleyda ee sanadlaha ah



Warbixinta Kooban ee isbadalaha Bisha

TSB-da ayaa bishan kor u kacay 0.6% bishii Luulyo 2026.

Qiima kororka ugu badan ee bishaan ayaa ka yimid

- Dharka iyo kabaha (+2.0%) oo ay sabab u tahay koror xooggan oo ku yimid Kabaha (+5.4%) taasoo muujinaysa baahida xilliyeed iyo kharashyo badan oo ku baxa soodejinta.
- Cuntada iyo cabitaanada (+0.9%) ka tarjumaysa soo kabashada hoos u dhacii bishii Juun, taasoo muujinaysa cadaadiska kor u kaca soo cusboonaaday ee ku cuntooyinka aasaasiga ah.
- Caafimaadka (+0.2%) oo ay taageerayaan kororka Adeegyada Bukaana-socodka (+0.3%) iyo Badeecada Caafimaadka (+0.4%), taasoo sii wadaysa isbeddelka kor u kaca kharashyada la xiriira daryeelka caafimaadka.


Isbeddellada hoos u dhaca ee is dheellitiraya:

- Adeegyada Waxbarashada (-1.2%) oo ay ku xiran tahay hagaajinta khidmadaha taasoo yareysay kharashyada waxbarashada inta lagu jiro bisha.
- Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska iyo Shidaalada kale (-0.6%) - oo ay sababtay hoos u dhaca Biyaha iyo Korontada, taasoo ah yareynta culayska kharashaadka korontada qoyska.

Shaxda 3. heerka qaybta boqolkiiba isbeddelka bishii

DHAMAAN QEYBAHA TSB-da	%beddel bishiiba		
	Maaj-26	Juun-26	luulyo-26
Wadarta guud ee TSB	0.3%	-2.7%	0.6%
01 - CUNTO IYO CABITAANNADA	1.3%	-4.0%	0.9%
02 - TUBAAKADDA	1.5%	-2.6%	0.3%
03 - DHARKA IYO KABAHA	2.7%	-2.0%	2.0%
04 - GURYAHA, BIYAHA, KORONTADA, GAASKA IYO SHIDAALKA KALE	-2.4%	-1.8%	-0.6%
05 - AGABKA, AGABKA GURIGA IYO DAYACTIRKA GURIGA EE JOOGTADA AH...	-0.4%	-0.7%	0.5%
06 - ADEEGA CAAFIMAADKA	-0.7%	0.0%	0.2%
07 - GAADIIDKA	-2.1%	-3.0%	0.5%
08 - MACLUUMAADKA IYO ISGAARINTA	0.3%	-1.3%	0.4%
09 - HAWA BEDELESHO, CIYAARAHA IYO DHAQANKA	0.4%	-0.7%	0.6%
10 - ADEEGYADA WAXBARASHADA	0.6%	0.8%	-1.2%
11 - MAQAAYADAHA IYO ADEEGYADA HOYGA	1.5%	-0.6%	0.6%
12 - CAYMISKA IYO ADEEGYADA MAALIYADA	1.1%	-1.5%	3.5%
13 - DARYEELKA SHAKHSIGA AH, DARYEELKA BULSHADA IYO ADEEGYADA YAR YAR	0.0%	0.0%	0.3%


Jaantuska 4. Heerka Qeybinta isbadelka Boqoleyda ee Billaha




WARBIXINTA TSB EE SOOMAALIYA - ISBARBARDHIGGA DOWLAAD GOBOLEDYADA

Jaantuska 5. Tusmooyinka TSB ee dowlad goboled kasta (a)

Mudada Tixraca =2022



(a) Tixraca Puntland waa la qiyaasay

Jaantuska 6. Boqolleyda ka-qeybqadashada dhibcaha ee heerka sicir-bararka (ka-qeybqadashada heer dowlad gobolled) (a)

(b) Tixraca Puntland waa la qiyaasay

War bixin Kooban ee Dhaqdhaqaaqa Sanadlaha ah

Muddadii laba iyo tobanka bilood aheyd ilaa luulyo 2026, isbeddellada togan ee dowlad goboleedyada ayaa ka yimid:


- **Jubbaland (+9.4%)** waxaana sabab u ahaa Dharka iyo Kabaha (+22.0%) Caafimaadka (12.0%)
- **Puntland (+7.3%)** oo ay hogaaminayaan Makhaayadaha iyo Adeegyada Hoyga (+20.9%), Caafimaadka (+18.7%), iyo Guraynta (+8.9%),
- **Galmudug (+6.8%)** waxaana u horseeday Cuntada iyo Cabitaannada (+19.2%), Dharka iyo Kabaha (+16.1%), iyo Adeegyada Maaliyadda (13.1%)
- **Hirshabeelle (+6.6%)** waxuuna sarakacu ka yimid Daryeelka Shakhsi ahaaned (30.9%), Qalabka Guriga (+25.6%), iyo Madadaalada (+25.2%).
- **Gobolka koonfur-galbeed (+6.7%)** – waxaa hogaminaya Makhaayadaha & Adeegyada Hoyga (+37.4%), Daryeelka Shakhsi ahaaneed (+12.7%), iyo Caafimaadka (+12.2%).
- **Banaadir (+5.6%)** – waxaa hogaaminaya Waxbarashada (+29.3%), Madadaalada (+17.6%), iyo Guraynta (+17.4%).

Intii lagu jiray bishii Luulyo 2026, ma jirin wax dhaqdhaqaaqyo taban ah.

Shaxda 4. Boqolkiiba isbeddelka heerka gobolka

Dowlad Goboleedyada	% - isbeddel sannadle ah		
	Maaj-26	Juun-26	Luulyo-26
Wadarta guud ee TSB-da	8.4%	8.1%	6.7%
BANAADIR	7.7%	8.6%	5.6%
PUNTLAND	9.2%	9.0%	7.3%
GALMUDUG	17.7%	12.4%	6.8%
HIRSHABELLE	6.3%	7.0%	6.6%
JUBALAND	7.7%	8.3%	9.4%
KOONFUR GALBEED	6.1%	6.2%	6.7%

(c) Tixraa Puntland waa la qiyaasay



(a) Tixraa Puntland waa la qiyaasay

War bixin Kooban ee Dhaqdhaqaaqa Billaha ah

Bishii Luulyo 2026, waxaa jiray dhaqdhaqaaqyo togan ayaa la diiwaan geliyay

- **Banaadir (+2.9%)** waxaa u horseeday caafimaadka (2.3%) iyo Adeegyada waxbarashada
- **Galmudug (+1.2%)** koror togan oo ka yimid cuntada iyo cabitaannada iyo Gaadidka.
- **Puntland (+0.6%)** kororka ayaa ka yimid Guryeynta (+.8%) iyo Gaadiidka (+7.6%).
- **Jubbaland (+0.3%)** kororka waxaa ku caawiyeey Makhaayadaha iyo Adeegyada Hoyga (+0.9%)
- **Koonfur Galbeed (-0.8%)**: Hoos waxaa ku sababay Guryeyta
- **Hirshabeelle (-1.1%)**: Hoos u dhac waxaa horseeday Guryeynta (-9.4%), qaybtaan waxaa ka soo kabanaya kororka Caafimaadka (+8.0%) iyo Cuntada (+5.7%).


Bishii Luulyo 2026, waxaa jiray dhaqdhaqaaqyo heer gobol oo taban/ Hoos u dhac.

- **Koonfur Galbeed (-0.8%)**: Hoos u dhaca waxaa sababay Guriyeynta
- **Hirshabeelle (-1.1%)**: Hoos u dhac waxaa horseeday Guryeynta (-9.4%),

Shaxda 5. Heer gobol ayaa isbeddelay boqolkiiba bishii

Dowlad Goboleedyada	%beddel bishiiba		
	Maajo-26	Juun-26	Luulyo-26
TSB- WADARTA GUUD	0.3%	-2.7%	0.6%
BANAADIR	0.9%	-1.9%	2.9%
PUNTLAND (a)	0.2%	-2.7%	0.6%
GALMUDUG	-0.3%	-4.9%	1.2%
HIRSHABELLE	2.3%	-4.7%	-1.1%
JUBALAND	-5.8%	-3.3%	0.3%
KOONFUR-GALBEED	2.3%	-1.6%	-0.8%

(a) Tixraaca Puntland waa la qiyaasay



(a) Tixraaca Puntland waa la qiyaasey